

Go'aan

✍ Ursula Nafula

✉ Vusi Malindi


☞ Abdi Muse

🔊 2

💬 Soomaali 




Tuuladayda waxay lahayd dhibaatooyin badan. Waxaan samaynay saf dheer si aan biyo ooga soo dhaansano tuubada.




Waxaan sugnay raashin ay nagu deeqeen dad kale.




Waxaan xirnay guryahanaga amin hore sababta oo ah tuugo.




Caruur badan ayaa dugsiga ka baxday.




Gabdhaha yaryar waxay ka shaqeyeen sidii
adeegto tuulooinka kale.



Wiilasha yaryar waxay ku wareegeysteen
agagaarka tuulada halka kuwa kale na ay ka
shaqeeyeen beeraha dadka.



Markii dabayshu kacdo, waraaqaha qashinka ayaa ka lalmado geedaha iyo dayrarka.




Dadka waxaa jarjaray dhalooyin jajaban kuwaa oo loo tuuray si taxadar la'aan ah.




Kadib hal maalin, tuubada ayaa biyo la'aan laga dhigay weelashanadana faaruq bey ahaayeen.




Aabahay ayaa guri guri ugu tagay asagoo waydiinayo dadka in ay ka qayb galaan shirka tuulada.



Dadka waxay iskugu soo urureen geed wayna hoostiisa wayna dhagaysteen.




Aabahay ayaa istaagay waxuuna yidhi,
"Waxaan u baahanahay in aan wada shaqayno
si aan u xallino dhibaatooyinkeena."




Juma oo sideed jir ah, oo kufadhiyo jirridda geedka ayaa ku qeyliyay, "Waan kaa caawin karaa nadiifinta."



Haweeney ayaa tiri, "Dumarka way igu soo biiri karaan si ay u beeraan cuntada."



Ninkale ayaa istaagay oo na yidhi, “Raggu waxa ay qodi doonaan ceel.”



Dhammaanteen waxaan ku dhawaaqnay,
"Waan ku qasbanahay in aan badelno
nolosheena." Maalintaas laga bilaabo waxaan
ka wada shaqeynay inaan xallino
dhibaatooyinkeena.



Global Storybooks

globalstorybooks.net

Go'aan

✍ Ursula Nafula
& Vusi Malindi
☞ Abdi Muse

